



(Ugama tegin gadaashayda fitno raga uga daran dumarka)

Usaama Binu Zeyd Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiibee, wuxuu ka wariyey Nabiga scw inuu yiri: (Ugama tegin gadaashayda fitno raga uga daran dumarka).

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay inuusan gadaashiisa uga tegin raga itaxaan iyo ibtilo uga daran dumarka, haday ehelkiisa tahay waxaa dhici kara inuu ku raaco wax ay sharciga ku khilaaftay, haday ajnabi ka tahayna inay is dhex galaan oo uu la khaali noqdo ayaa fasaad uga imaan karaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5830>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

